

Waalidnimada Caaafimaadka Qabta ee Ohio dhexdeeda

Inkasta oo waalidnimadu ay iskaga mid tahay wax yaalo badan dhaqan kasta, hadana dhaqan kastaa wuxuu leeyahay muuqaal u gooniya doorka (kaalinta) uu lee yahay waalidku, ogolaanshaha iyo diidmada iyo barida dhaqanka. Maxaa yeelay bulshadayadu, sida aduunka kale, waa hodan waana dad kala duwan , badiyaa uma qeexno dhaqan ka mid ah dhaqamada barbaarinta caruurta inuu yahay sax halka mid kale ka yahay qalad. Waxaanu fahansanahay inay jiri doonto kala duwanaansho kala duwanaanshuhuna maaha qalad.

Laakiin Gobolka Ohio wuxuu lee yahay sharciyo ku siinaya muuqaalka guud ee wixii "saxa" iyo wixii "qalada" iyada oo la eegayo qiyaaso balaaran marka la eego sida loola dhaqmay ilmaha. Waa muhiim dadka cusub ee yimid wadankayaga iyo gobolkayaga inay ogaadaan qiyaasaha ayna hubiyaan in gudashada ma'suuliyada waalidnimadooda inay waafaqsan tahay sharciyada Ohio.

Waa suurtagal in waxyaalaha la sameeyo dhaqamada qaarkood ama wadamada qaarkood aan lagu ogolayn in lagu sameeyo Maraykanka Gudihisa ama Ohio gudaheeda. Sharciyada waxaa loo sameeyey in lagu ilaaliyo caruurta lagana fogeeyo wixii waxyeelo ah, laakiin sharciyadu waxay ka turjumaan waxyaalaha uu aaminsanyahay dhaqan.

Sababtaa darted ACTION OHIO waxay kuu diyaarisay buug warbixineed, si uu u caawiyo kaalmaynta dadka cusub ee ku soo biiray bulshadayada inay bartaan sharciyada iyo xadka loo sameeyey si loo hubiyo korida, barbaarinta iyo wanaaga caruurta.

Weeraha Sharciga ah ee Mudan in la Ogaado:

Si Xun ula Macaamilida Caruurta

Khatar-gelinta Caruurta

Ogolaanshaha in lagu Xad gudbo Caruurta

Mashruucan waxaa ka dhigay suura gal lacag ay ku deeqday hay'ada International Rescue Committee.



Ku Dhisida Qoys Caafimaad Qaba Ohio Dhexdeeda

Qaxootiga Cusub ee Dib loo dejiyey



ACTION OHIO

*Oo u dooda dhibanayaasha, dadka ka badbaaday rabshadaha iyo
qoysaska ay ku dhacday rabshaduhu*

36 W. Gay St., Suite 311
Columbus, OH 43215
Phone: 614-221-1255
Toll-Free: 1-888-622-9315
Fax: 614-221-6357
Email: actionoh@ee.net
www.actionohio.org

ACTION OHIO

Coalition For Battered Women
36 W. Gay St., Suite 311
Columbus, OH 43215
614.221.1255/1.888.622.9315
www.actionohio.org

Qeexida Si Xun ula Macaamilida Caruurta & Khatar-gelinta Caruurta

Si Xun ula Macaamilida Caruurta

Waxaa jira afar nooc oo waaweyn oo ah si xun ula macaamilida caruurta :

Dayacaad

Wax laga arki karo jirka

Illaalin la'aan, guri la'aan, dhar la'aan, daryeel caafimaad la'aan, cunto la'aan

Nafsi ah (Emotional)

Taageero la'aan, u feejignaan la'aan iyo roonaan la'aanta caruurta

Waxbarasho

Waxbarasho la'aan, ama u feejignaan la'aanta baahida waxbarashada gaarka ah

Xad gudubka jirka ee muuqda

Dhaawaca aanu keenin shil ee ku dhaca caruurta

Xad gudubka ah Galmada

Wax alla wixii ah xiriir galmo ee uu ku sameeyo ama la sameeyo ilmo qof sadexaad

Xad gudubka nafsiga ah

Dabeecado dhabqinaya ama fargelinaya korida nafsiyeed iyo/ama bulsheed ee ilmaha sida cambaaraynta, hanjabaada, diidmada (qaadacaada)

Caruurta waa

- Qofka ay da'diisu ka yar tahay 18 sanno.
- Qofka ay da'diisu ka yar tahay 21 sanno kaa soo ah dadka maskaxda ka dhiman ama curyaamiinta ah.

Khatar-gelinta Caruurta

Waalid ahaan, waxay kugu tahay **DANBI** khatar ah:

- 1) Ku xad gudbida caruurta;
- 2) Ciqaabida ama ku xad gudubka caruurta si ay cadawtinimo ku jirto;
- 3) In lagu sameeyo jir dil ama ciqaabta jirka iyada oo la edbinayo kaa soo xad dhaafa iyo in la abuurro khatar badan oo ahmid waxyeelaysa jirka ilmaha, ama in la xirxiro ilmaha si ay cadawtinimo ku jirto ama mudo dheer.
- 4) Ku celcelinta in laga edbiyo caruurta waxyaalaha aan laga maarmaanka ahayn, marka ay edbintaasi abuurayso khatar badan oo ah inay daciifiso caafimmaadkiisa maskaxda ama koritaankiisa

Liistada oo dhamays tiran iyo qeexitaanka, ka eeg ORC qaybta 2919.22.

Ogolaanshaha in lagu Xad gudbo Caruurta

Xitaa hadii aadan ahayn ka waxyeelo gaarsiinaya caruurta, hadana waxay kugu tahay **DANBI** inaad ogolaato in caruurta:

- 1) Lagu xadgubo;
- 2) La ciqaabo;
- 3) In lagu sameeyo si xad dhaafa jir dil ama ciqaabta jirka iyada oo la edbinayo kaa soo sababaha waxyeelo halis u ah caruurta;
- 4) In la xirxiro ilmaha si ay cadawtinimo ku jirto ama mudo dheer,

adiga oo aan haysan hab diyaara oo lagu joojiyo waxyeelada ama dhimashada ilmaha mooyaane aadna qaadatay wakhti iyo talaabooyin macquula si aad ugu wacato caawimo.

Qeexid intaa ka badan oo faahfaahsan, ka eeg ORC qaybta 2903.15(A) & (C).

Taxadiga Korinta Caruurta

Korinta caruurta waa hawl taxadi leh. Waana ay ka sii dhib badan tahay marka qoysku uu u guuro wadan cusub. Caruurta waxay ula qabsadaan dhaqanka cusub si ka dhakh siiyo badan waalidkooda.

Si ay ugu guulaystaan dugsigooda, waa inay bartaan sida xiriir loogu sameeyo iyo sida loogu dhaqmo hab cusub. Inta uu ilmuhu la qabsanayo caadooyinka cusub iyo luqada cusub, waalidiintu waxay ka baqaan inay caruurtoodu ka go'ayaan caadooyinkii qoyskooda. Xiisad ayaa ka dhex aloosanta jiilka yar yar iyo jiilka waaweyn. Labaduba waxay ka jawaabayaana cadaadiska uu lee yahay imaatinka meel cusub iyo baahida looga baahan yahay inay sameeyaan isbadal badan.

Caruurta la qabsanaysa dhaqanka cusub waxaa laga yaabaa inay ka falaagoobaan caadooyinkii iyo dhaqankii uu lahaa qoysku. Xitaa waalidka ugu kalgacalka iyo fahamka badani waxa laga yaabaa inuu dareemo diidmo iyo aflagaado kaga imanaysa caruurtooda.

Dhaqanka Maraykanku, wuxuu u arkaa caadi in dhalinyarada ay da'doodu u dhaxayso 13 - 19 sanno ay soo maraan mudo ay ku sameeyaan taxadi maamulka waalidka. Bulshadayadu waxay leedahay xeelado lagu caawiyo waalidiinta waktigan ay dhalinyaradu wax isbidayaan. waxa jira hay'ado iyo wakaalado loo sameeyey si ay u bixiyaan taageero iyo dhiirigalin.

- La sheekayso caruurtaada lana wadaag sheekooyinka qoyska iyo waxyaabaha sharafta leh ee uu qoysku ku faano.
- Ka caawi caruurtaada sidii ay u fahmi lahaayeen in dhaqanka iyo caadooyinka qoyskaagu hodan ka dhigayaan bulshadaada cusub.
- Ogow inaad keli ku ahayn soo marida xiisada iyo walwalka waalid ahaan iyo qof cusub ahaan.
- Kala xiriir ururada jaaliyadaha ee degaankaaga wixii taageero ah, xeelad ah iyo xog ah.